Somali

Waa kuwan xeerarka cusub ee caabuqa koroonaha ee ay tahay inaad ku dhaqantid magaaladan Trondheim

Guddiga sare ee golaha deegaanka (Formannskapet) waxay talaado 5-ta janaayo caabuqa koroona ka go'aamiyeen xeer cusub. Maqaalkan waxaad ka akhrisan kartaa xeerarka aaggan ee ku saabsan amarrada qaranka iyo waanooyin iyo talooyin guud si loo xakameeyo faafitaanka caabuqa.

Arrintan waxaa cusboonaysiin lagu sameeyey ka gadaal shirkii guddiga sare ee 5. janaayo.

Xeerka deegaankan Trondheim

Xeerar-deegaankani waxay khuseeyaan Trondheim, si ku meel gaar ah ilaa iyo 31 janaayo 2021.

Xaddidaadda suuqyada ganacsiga
Tirada dadka dukaanada iyo suuqa ganacsiga waxaa lagu xaddiday in dadka macaamiisha ahi ay xilli kasta isu jirsadaan hal mitir. Tirada macaamiisha waxay ku xirantahay goobtu inta ay leegtahay si ay u suurogasho in goor walba la isu jirsankaro hal mitir. Haddii loo baahdo waxaa la imanayaa waardiye si loo hubsado in lagu dhaqmo sidaas la dalbayo.

Waa amar in la xirto gafuurka (afka iyo sanka)
Waa amar in la xirto gafuurka kolka la raacayo gaadiidka dadweynaha iyo tagsiga. Amarku wuxuu kaloo khuseeyaa marka lagu gudajiro meelaha laga safro. Tagsiga waa in kuwa qaadanayaa ay diiwaangeliyaan magacooda iyo lambarka talifoonka. Waxaa iyana amarku khuseeyaa meelaha timo jaraha, daryeelka maqaarka, iyo adeegyada jir-xardhista iyo jir-daloolinta iwm. Waajibku wuxuu saaranyahay shaqaalaha iyo macaamiishaba. Macaamiishu way iska qaadikaraan gafuurxirka marka ay lagama maarmaan u tahay adeeg u qabadka.

Waxaa kaloo amarka gafuurxirku khuseeyaa dukaanada/suuqyada ganacsiga, meelaha cuntada iyo cabbitaanka, aqallada diimaha iyo goobaha tababbarka, isboortiga iyo nashaadooyinka xilliga firaaqada la yahay.

Waxaa amarka gafuurxiradka laga dhaafay carruurta ka yar 12 sano iyo dadka caafimaad ahaan ama sababo kale awgood aan u xirankarayn.

Waxaa lagu talinayaa in gafuurxirka la isticmaalo kolka carruurta la keenayo ama laga wadayo xannaanada carruurta. Way wacantahay in dadka waaweyni ay carruurta kala hadlaan sababta sidaas loo yeelayo, iyo in afxirka layska qaadikaro haddii carruurta qaarkood ka cabsadaan. Waxaa kaloo dawladda hoose ay xannaanooyinka carruurta ku boorinaysaa inay sahlaan in carruur keenista iyo wadistu ay ka dhacday dibedda meesh ay u suuroobayso.

Xafiis-guriyeed

Degmadan Trondheim iminka waxaa kugu waajib ah in aad guriga xafiis ahaan ugu shaqaysid kolka ay taasi ku habboontahay shaqo fulinta. Xeerku wuxuu leeyahay in loo shaqeeyayaashu
ay ku dadaalaan in shaqaaluhu guryaha ku shaqeeyaan hadba sida ay taasi suurogal u tahay in shaqadu ku fulayso. Loo shaqeeyuhu waa inuu caddaynkaro in shaqaaluhu ay heeleen farriin sida shaqada loo fulinayo. Teeda kale waxaa la raacayaa xeeraarka iyo tilmaamaha qaranka ee khusseya ka hortagga faafitaanka caabuqa ee goobaha shaqada.

Goobaha cuntada iyo cabbitaanka
Maqaayadaha iyo meelaha qamrada ee degmada Trondheim way furnaan karaan haddii ay buuxiyaan shuruudaha ah inay goobahaas si qumman meheradda uga socodsiiyaan iyagoo ku dhaqmaya xeerka covid-19. Dhammaan maqaayadaha iyo meelaha qamradu waa inay diiwaangeliyaan kiliyanti kasta kolka ay yimaadaan. Degmada Trondheim way xirikartaa goobahaas cunada iyo cabitaanada ee ku dhaqmi waaya shuruudaha laga rabo ee ka hortagga faafitaanka caabuqa iyo shuruudaha xeerkani dalbayo.
Intaa waxaa dheer in mas'uuliyiinta qaranku ay soo saareen in dalka oo dhan laga joojiyo qamrada tuubada laga shubo laga bilaabo 4. janaayo ilaa iyo 17 janaayo.

Kulanka bulshada - kala fogaanta
Degmadan Trondheim waxaa laysku amray in la xaddido dhammaan kulanka bulshada ee ka baxsan inta wadaagta guriga/shaqada/iskoolka/xannaanada carruurta. Kulamada bulsho ee ka baxsan inta guri wadadeggan iyo kulamada xaalad shaqo ku yimi, waxaa lagu xaddiday 10 usbuuciiba. Kulan 10 ah waxaa loola jeedaa wadarta dhammaan xubnaha guryo wadaagta ah oo aan lagu darin kulanka xannaanada carruurta, iskoolka iyo shaqada.

Tababbarka - ciyaaraha fudu
Waxaa la soo saaray shardi ah in labo mitir laysu jirsado kolka dadku ay ku tababbaranayaan goobaha tababbarka, xarunta jir-tababbarka iwm.
Hoolasha ciyaaraha fudud way xirnaanayaan ilaa 18.01.2021 waxaase laga reebay loollamada waaweyn.
Nashaadooyinka xilliga firaaqada waa la baajiyey ilaa 18.01.2021 waxaase laga reebay iskoolka dhaqanka iyo naadiyada xilliga firaaqada ee carruurta/dhallinta qabta baahi gaar ah.

Xannaanooyinka carruurta iyo iskoolada ku jira heerka jaallaha/huruudda ah
Dugsiyada hoose iyo xannaanooyinka carruurta waxay weli ku jiraan heerka jaallaha, hase yeeshee si joogto ah ayaa loo qiimaynayaa hadba sida xaaladda faafitaanka caabuqu tahay. Waxyaalaha la qiimeeyo waxaa ka mid ah bal in wax laga dhimo waqtiga ay furnaanayaan xannaanooyinka carruurtu. Haddii loo baahdo in wax laga dhimo waqtiga ay furnaanayaan sababtoo ah xaaladda cududda shaqaalaha, karantiino iwm, waxaa la soo dirayaa war ku saabsan arrintaas oo ka imanaya xannaanada carruurta ee taasi ay khusayso.

Haddii aan farriin kale lagu gudbin buugga Meldeboka waa in ardayda dugsiga hoose ee safafka 1aad - 7aad iyo carruurta xannaanaduba ay sidii caadiga ahayd u yimaadaan.

Dugsiyada dhexe
Ku meel gaar ahaan muddada ka bilaabanta 4-18 janaayo waxay dugsiyada dhexe ee Trondheim ku jirayaan heerka guduudka/casaanka, sida ay dawladdu ku talisay.

Maaddooyinka baraatikada/fanka iyo farshaxanka, jimicsiga jirka, luuqadaha, maaddooyinka la doorto iyo doorashada ku xeeldheeraanta luuqad kale waxaa loo fulinayaa heerar kala duwan, hadba xaaladda dugsigaasi sida u habboon. Wixii kalee dheeraad ah ee gaar u habayso iyo waxqabad ah waxaa lagu sheegayaa buugga Meldeboka.
Waxaa weli dhammaan waajib ku wada ah waxqabadka aasaasiga ah ee looga hortagayo faafitaanka caabuqa oo aan la imaanin iskoolka haddii qofku buko, iyo in la xusuusto gacmo dhaqa iyo kala fogaanshaha.

Dugsiga dhaqmeedku dib ayuu u dhigay deeqdii waxbarasho ee kooxda ku salaysnayd ee la siinjiray dhallinyarada da'da iskooleyda ku jirta ee dugsiga dhexe iyo dugsiga sare ilaa 18 janaayo. Deeqda waxaa haddii la garto loo beddeli karaa deeq qof-qof ah. Deeqdii hore u jirtay ee qof-qofka ahayd way sii soconaysaa. Sidii hore ee caadiga ahayd ayaa loogu dhaqmayaa ka hortagga faafitaanka caabuqa ee aasaasiga ah.

Dugsiyada sare
Dawladdu waxay ku talisay in dugsiyada sare la geliyo heerka guduudka, degmada Tronheim- na waxay raacaysaa taladaas. Guddoomiyaha gobolka ayaa ardaydiisa uga warrimidoona qorshaha waxbarasho ee baraatikada ah kolka lagu jiro heerka guduudka.

Halkan ka akhriso faahfaahin khusayasa waxa loola jeedo heerka jaallaha iyo guduudka ee xannaanooyinka iyo dugsiyada.

Macluumaad dheeraad ah:
Xeerka deeggankan iyo soo bandhigga arrinta waxaad ka helaysaa halkan
Trondheim kommunes samleside om korona-situasjon

Degmooyinka aaggan Trondheim waxay iyana gudbiyeen talooyin deegaanka ah oo ka hadlaya sida la isaga dhex safro degmooyinka. Talooyinkaas oo faahfaahsan waxaad ka akhriyi kartaa halkan.
Begrensning i reise mellom kommunene

Amarada qaranku waxay kaloo khuseeyaan

Xeerkan deegaankan ee degmada Trondheim waxaa dheer, in dawladdu ay soo saartay amarro khuseeya dalka gebi ahaanba.

Waxaa la soo saaray amar qaran oo ku saabsan in ugu badnaan shan qof ay gaarkooda isugu imaankaraan goob ka baxsan gurigooda, sida tusaale ahaan dabbaaldeg dhalasho oo lagu qabsado meel la ijaartay. Haddii dadka wada deggani ay ka badanyihiin shan qof, dabcan way wada kulmi karaan.

Waxaa kaloo amar ah in ugu badnaan toban qof ay isugu yimaadaan gudaha meelaha munaasabado ciyaaro fudud, munaasabado dhaqameed, aqoon isweydaarsiyo, kulan diimeedyo, xaflado iwm. Hase yeeshee waa la oggolyahay in 200 oo qof kolka ay daawada-

yaashu ku fariisanayaan kuraas meeshooda ku dhidban. Duugista waxaa la ahaan karaa ilaa 50 qof, xataa haddii kuraastu aanay dhidbanayn.
Waxaa la soo saaray in dalkoo idil laga mamnuucay shubista qamrada tuubada meelaha cuntada iyo cabbitaanka iyo munaasabadaha.

Talooyinka qaranka

Amarrada qaranka waxaa dheer in dawladdu ay soo dirtay talooyin dhawr ah oo ku saabsan sida qumman ee aynu u dhaqmayno si loo xaddido faafitaanka caabuqa.

Kulanka bulsho

Ka dheerow marti guriga kuu timaada. Sug 14 beri in booqasho shaqsi laguugu yimaado. (Taas macnaheedo waa ku meel gaar ahaan ilaa 17 janaayo). Waxaa taas ku jirin adeegyada guriga ee lagama maarmaanka ah iyo booqashada loogu imanayo dadka ku jira nafgo' dhow. Qofka keli deggan waa la soo booqankaraa booqashana wuu u bixikaraa hal ama labo saaxiib oo joogto ah ama dad joogto ah oo aqal wada deggan. Carruurta xannaanada carruurta iyo carruurta dugsiga hoose waxaa soo booqankara kuwa ay isku kooxda yihiin. Guddiga sare ee Trondheim (Formannskapet) waxay hoosta ka xarriiqayaan macnaha ay leedahay dadku inuu kala fogaado waxayna aad ugu boorinayaan shacabka degmadan inay u hoggaansamaan talooyinka qarameedka mas'uuliyiinta ee ku saabsan marti guriga kuugu timaada 14ka beri ee ina xiga (ilaa iyo 17 janaayo), waxaase laga reebay kuwa lagu sheegay talooyinka qaranka.

Safarka

Ka dheerow safarada aan loo baahnayn ee dalka gudihiisa iyo dibeddiisaba. Ilaa iyo hadda weli la iska waanin maayo in joogo baraakooyinka duurka haddii dadku isla aqal deggan-yihiin, ee ka mid ah waanooyinka deegaanka iyo kuwa qaranka iyo xeerarka khuseeyaba.

Halkan waxaad ka akhrisankartaa amarrada iyo talooyinka dawladda laga bilaabo 3 janaayo (af norwiiji).

Af ingiriis: https:/www.regjerinen.no/en/topics/koronavirus-covid-19/id26922388/

Huteelka koroonaha

Waa inaad 10 beri gashid karantiino-safareed haddii aad Norwey kaga timi dalal guduud saaranyahay.

Dhammaan dadka caddaynkara inay haystaan meel ay karantiinada joogaan, wey yeeli karaan taas halka ay ka aadi lahaayeen huteelka karantiinada. Arrintani waxay dhaqan gelaysa laga bilaabo hadda, halkii ay markii hore ka ahaan jirtay in kuwa joogitaankoodu ujeeddo kale lahaa aan ka ahyan shaqo ama hawl uu fulinayo, ay lagama maarmaan u ahayd inay isticmaalaan huteelka karantiinada.
Kuwa safarka ah ee dalal dibedda ah kasoo gala Norwey way ka bixikaraan karantiinada ka gadaal ugu soo hoorayn maalinta toddobaad haddii tijaabada labo jeer laga waayo covid-19 ka dib imaatinkooda. Tijaabada hore waa in lagu qaado saddex beri gudahood ka dib imaatinkooda, tan labaad ugu horrayn maalinta toddobaad ka dib imaatinka.